



Madaxtooyada Dawladda Puntland War-saxaafadeed

TIX/0017/2017
June 01, 2017

Shirkii Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland oo uu shir-guddoominayey Madaxweynaha Dawladda Puntland Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas, ayaa looga hadlay arimaha kala ah Amniga dalka, Ansixinta xeerka guddiga sare ee garsoorka Puntland, Xiriirka iyo wadashaqeynta Xukuumadda Federaalka, Safarkii Madaxweynaha ee yurub, Xiriirka Puntland iyo Galmudug iyo Warbiximo.

Xaaladda Amniga Dalka:

Golaha xukuumadda Dawladda Puntland ayaa caddeeyay in dhammaan ciidamada kala duwan ee Puntland ay ku jiraan feejignaan iyo howl-galo joogto ah, maadaama ay ka jiraan koonfurta Soomaaliya dhaqdhaqaaqo lagu beegsanayo Al-shabaab, arintaas oo keeni karta in Burcad-Diimeedka Al-shabaab ay u soo talaabaan deegamada Puntland.

Sidoo kale Madaxweynaha Puntland ayaa hambalyo iyo bogaadin u diray laamaha amniga Puntland guud ahaan, gaar ahaan ciimadama ka howgala Gobolka Bari oo gacanta ku dhigay qaraxyo waaweyn iyo sharwada-yaashii maleegayey dhibaataaynta shacabka Puntland, isla markaana wuxuu Madaxweynuhu u balan-qaaday dalacsiin iyo maamuus sharafeed ciidan in lagu abaal marin-doono iyaga iyo Askarigii ku dhintay qaraxii 23-dii May

Ansixinta Xeerka Guddiga sare ee Garsoorka Puntland.

Golaha xukuumadda Dawladda Puntland ayaa maanta Ansixiyay xeerka guddiga sare ee garsoorka Puntland, xeerkaan oo uu dhigayo Dastuurka Puntland qodobkiisa 102 oo qeexaya ilaallinta xeerka iyo madaxbanaanida garsoorka Puntland.

Xiriirka iyo Wadashaqeynta Xukuumadda Federaalka

Golaha xukuumadda Dawladda Puntland ayaa caddeeyay in Dastuurka Dawladda Federaalka Soomaaliya uu yahay mid qabyo ah, isla markaana aan koox-na si gooni ah u fasiran karin awoodihiisa, sidoo kale goluhu waxay sheegeen in Baarlamaanka federaalka